

Amarka Sargaalka Caafimaadka Deegaanka King County

Af-xirasho hadda waa ku waajib dhacdo kasta oo bannaanka ah oo 500 oo qof ama ka badan ka qeybgaleyso.

Amarkan waxaa loogu talagalay dhammaan dadka tallaalan iyo kuwa aan tallaalneynba, da'da 5 sano iyo wixii ka weyn.



Af-xirashooyinka sidoo kale waxaa hadda **si adag lagula talinayaa** dhammaan dadka 5 sano jira iyo ciddii ka weyn — labadaba kuwa tallaalan iyo kuwa aan tallaalneynba — oo ku jira **xaalado kale oo bannaanka** ah meeshaasoo dadka isku-guriga ahayn aysan kala fogaan karin ugu yaraan 6 taako.



Ka yar 6 taako
← →



Maxaa keenay amar cusub oo bannaanka?

- King County wuxuu leeyahay heerar aad sare ugu socda ee faafka COVID-19.
- Nidaamkeena daryeelka caafimaadka wuxuu ku jiraa cadaadis aad u daran.
- **Caabuqa Delta** si baaxad leh buu u faafi-og yahay waxaana lala xiriiriyay khatar u weyn xagga isbitaal-jiifinta.
- Dadka si buuxda u tallaalan waxay leeyihiin heerar aad u sarreeya oo difaac ka dhan ah xanuunka daran COVID-19 awgiis laakiin **weli wey u gudbin karaan dadka kale.**

Xasuusta, weli waa waajib in maaskaro gudaha meelaha dadweynaha lagu xirto.

Laga bilaabo Agoosto 23 keeda, qofkasta oo jira 5 sano ama ka weyn ee jooga gobolka Washington waxaa ku waajib ah xirashada maaskaro markii **lagu jiro meelaha dadweynaha**, sida dukaamada cuntada, suuqyada waaweyn (malls), meelaha jimicsiga, iyo xarumaha bulshada.

Sidookale, qofkasta waa inuu sii wado xirashada maaskaro le'eg markii lagu dhex-jiro xabsiyada, hoy'yada dadka guri-la'aanta, dugsiyada iyo meelaha xannaanada ilmaha, gaadiidka dadweynaha, iyo meelaha daryeelka caafimaadka sida xafiisyada dhaqaatiirta, daryeelka muddada dheer, iyo isbitaallada.



Macluumaad dheeraada, booqo
kingcounty.gov/masks

Public Health
Seattle & King County

